



# Nolasha Dugsiga Sare ka Dib

waa hagto loogu tala galay qoysaska dhaqamada iyo luqadaha

kala duwan ee haysta da' yar naafo ah

Open Doors for Multicultural Families  
[www.multiculturalfamilies.org](http://www.multiculturalfamilies.org)

**SOMALI**



# OPEN DOORS

*for* MULTICULTURAL FAMILIES

...dedicated to the needs of diverse families who have loved ones with developmental disabilities and special health care needs

## Howl-gal

Howl-galka Open Doors for Multicultural Families waa in la hubiyo in qoysaska kala duwan ee kuwo ay jecel yihiin qabaaan naafanimu xaga korriinka ah ama u baahan daryeelka caafimaad oo gaar ah inay si siman u helaan macluumaadka la xidhiidha xaga dhaqanka, luqad ahaanna haboon, ilo-dhaqaale, iyo adeegyo.

24437 Russell Rd Suite 110,  
Kent WA 98032

Phone: 253-216-4479 Fax: 253-499-0014

[www.multiculturalfamilies.org](http://www.multiculturalfamilies.org)

## Mahad celin

### **Ka qaybqaadasho xaga bulshada oo muhiim ah**

Waxaan mahad gaar ah u celinaynaa waalidiinta dhaqan iyo luqadba kala duwan iyo kuwa naftooda matala ee nala wadaagay waayo-aragnimadooda iyo talooyinkooda.

#### **Waalidiinta**

Ginger  
Lul  
Min  
Nam  
Rocio

#### **Naftooda matala**

Fathi  
Jean  
Ky  
Mai  
Mickle

Rahma  
Ros  
Selim

## Table of Contents

Howl-gal.....	i
Mahad celin.....	i
Ka qaybqaadasho xaga bulshada oo muhiim ah.....	i
Billowga ka hor: Arimo Tix-gelin Mudan.....	- 1 -
Sidee bay hagtadan wax u caawin kartaa?.....	- 2 -
Gogoldhig.....	- 3 -
Maxaan uga baahannahay hagto xilliga kala guurka?.....	- 3 -
Marxaladda kala guurka: Maxay tahay? Maxayse macno ah ay adiga kuu leedahay?.....	- 4 -
Adeeg iyo taageero isku dhafan.....	- 5 -
La kulan Mickle iyo Nidaamkiisa Taakulaynta Iskudhafan.....	- 6 -
Daahfur: Anigu kumaan ahay?.....	- 9 -
Waa maxay Qorshaynta Dhexe ee Qofka?.....	- 9 -
Maxay PCP (Qorshaynta Dhexe ee Qofka) Muhiim u tahay?.....	- 9 -
La kulan Mickle iyo Qoyskiisa.....	- 10 -
Daahfur: Maxaan Rabaa Mustaqbalka?.....	- 11 -
Waano Qoys: Maxay tahay muhiimadda ay leedahay qorshaynta hore?.....	- 11 -
Mickle and Aragtida Qoyskiisa ee Mustaqbalka.....	- 11 -
Khibradaha caawiyay Mickle muddada marxaladda kala guurka.....	- 12 -
Sida Qoyskayagu u Taageeray Mickle muddada Marxaladda kala guurka.....	- 12 -
Daahfur: Sideen ku heli karaa Taageerada aan u Baahanahay?.....	- 13 -
Waa maxay Shaacinta Itaal-la'aanta (Disability Disclosure)?.....	- 14 -
Maxay Shaacinta Naafanimadu Muhiim u tahay?.....	- 14 -
Talo: Qoysaska iyo saaxiibada waxay ka hadlaan shaacinta iyo nafta oo loo dodo.....	- 15 -
Sidee qoysaska u caawin karaan?.....	15
Resources.....	16

## Billowga ka hor: Arimo Tix-gelin Mudan

Marxadaha kala duwan ee noloshu, dhalinyarada iyo qoyska waxaa laga yaabaa inay ka fikiraan kaliya xaaladaha hadda taagan. Maadaama ay dhalinyaradu guda galayaan qaan-gaadhimo, waxaa lagama maarmaan ah aragti fog. Waxay taasi ka caawinaysaa in laga fikiro noloshu mustaqbalka ee dhalinyarada iyo qoyskuba rabo. Helitaanka taageerada saxda ah waxay dhalinyarada iyo qoysaskuba ka caawinaysaa inay u dhaqaaqaan hiigsiga gool nololeed oo waara

## Shaxda Jiheeyaha Noloshu (Charting the Life Course)<sup>1</sup>:



Qaab dhismeedkan kore wuxuu dhammaan shakhsiyaadka kala awoodda iyo da 'da ah iyo qoysaskooduba ka caawinayaa inay:

- Horumariyaan aragti horseeda nolol wanaagsan.
- Ka fikiraan waxa ay u baahan yihiin inay ogaadaan ama sameeyaan.
- Gartaan sida loo raadiyo ama loo kobciyo taageerada.
- Ogaadaan waxa ay qaadanayso noloshu ay doonayaan inay ku noolaadaan.

<sup>1</sup> Charting LifeCourse is a framework of the Family to Family LifeCourse Network | UMKC IHD, UCEDD. More materials at [lifecoursetools.com](http://lifecoursetools.com)

## Sidee bay hagtadan wax u caawin kartaa?

Markaan isu gayno kala duwanaanta dhaqanka iyo luqada iyo hanaanka marxaladda kala guurka, noloshu waxay noqonaysaa xujo aad u adag. Marka la raaco hagtadan, waxaan rajeyneynaa in qoysaska iyo dhalinyaraduba ay awood u yeelan doonaan in ay:

- Kala xidhiidhaan baahida shakhsiga iyo qoyska.
- La shaqeeyaan kooxda marxaladda kala guurka.
- Dhameystiraan codsiga adeegyada ka hor inta aysan dhalinyaradu ka tagin dugsiga.
- Aasaasaan xidhiidho ku aadan ilaha muhiimka ah ee nolosha dugsiga ka dib.

## Sidee hagtadan loo habeeyay?



Qaybta 1: Daahfur shakhsiyadeed iyo Naf matalaad



Qaybta 2: Marxaladda kala guurka Dugsiga



Qaybta 3: Fursadda Nolol Maalmeedka



Qaybta 4: Badbaadada iyo Ammaanka



Lifaaq: Keydka Macluumaadka

# Gogoldhig

## Yey tahay inuu hagtadan akhriyo marxaladda kala guurka?

Haddii aad tahay dhallinyaro da'diisu u dhaxeeyo 16 iyo 21 xagna naafo ah, waxaan hagtadan u qornay adiga iyo qoyskaaga. Mudada marxaladda kala-guurka (transition), goorta aad dugsiga sare ka baxdo una jihaysatid nolosha dadka waaweyn waa muhiim inay dhalinyarada iyo qoysaskooda kaalin firfircoon ka qaataan qorshaynta marxaladda kala-guurka (transition planning).

Hagtadan waxay si gaar ah muhiim ugu tahay qoysaska u baahan caawino iyo waqti dheeri ah si ay u fahmaan hannaanka marxaladda kala guurka iyo si ay u ogaadaan ilaha-dhaqaale ee la heli karo.



## Maxaan uga baahannahay hagto xilliga kala guurka?



### Dhaqanku waa Muhiim

Qoysasku waxay ka yimaadaan dhaqamo kala duwan. Citiqaadka qoysaska iyo qiyamkooda waxaa laga yaabaa inay ka gedisan tahay kuwa xirfadlayaalka ah.

Hagtadan waxay ka caawinaysaa dhalinyarada iyo qoysaska inay gartaan kala duwanaanshaha iyo inay ogaadaan go'aanada ku saabsan waxa iyaga u fiican.

## Qorshayntu waa Muhiim

Ma garanayno mustaqbalka, laakiin waan u diyaar garoobi karnaa. Qaar ka mid ah qoysaska waxay u baahan yihiin caawinaad si ay isugu diyaariyaan mustaqbalka. Ogaanshaha halka aad ka helayso macluumaad ku saabsan howl-fududaynta xilliga kala guurka waxay qoyska iyo dhallinyarada ka caawinaysaa sidii ay u heli lahaayeen adeegyada ay u baahan yihiin.



## Waqtigu waa Muhiim

Marxaladda kala guurka sidoo kale waxay ku lug leedahay codsiga adeegyada. Dadka waaweyn ee xagna naafada ah waxay u baahan yihiin u qalmidda adeegyada si ay u helaan. Waxaa sidoo kale oo muhiim ah in qorsheynta horay loo bilaabo, iyadoo dhalinyarada qaar ay u baahan yihiin waqti dheeraad ah si ay u bartaan xirfadaha ay u baahan yihiin kolkay weynaadaan.

## Marxaladda kala guurka: Maxay tahay? Maxayse macno ah ay adiga kuu leedahay?

Mudada lagu jiro dugsiga sare, erayga marxaladda kala guuritaan (transition) marar badan ayuu soo noqnoqdaa.

Marxaladda kala guurka waa muddo muhiim u ah dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 16 iyo 21 sano jir. Sida inta badan dadka da'daada ah, waxay u badan tahay inaad dugsiga sare dhigato, aadna ku nooshahay guriga qoyskaaga. Taageerooyin badan oo isku dubaridan una dhaxeeya qoyska, xirfadlayaasha iyo dugsiga ayaa kaa caawiya nolol maalmeedka. Si kastaba ha ahaatee, marka aad dugsiga ka qalin jabiso, qaybo ka mid ah noloshaada way is bedeli doontaa. Mar dambe ma aadi doontid dugsiga sare. Sideed maalintaada u isticmaali doontaa? Waxaa laga yaabaa in aad ku noolaato guri adiga kuu gaar ah. Waxaa laga yaabaa inaad kulliyad bilowdo ama shaqo hesho. Waxaa jiri doona isbedello badan, u diyaar garoobidda isbedelladaas waxaa loo yaqaannaa marxaladda kala-guurka.



Qof kasta wuxuu u baahan yahay taageero xaga nolosha ah. Si kastaba ha ahaatee, ogaanshaha meesha laga helo taageerada iyo cidda la weydiisto waxay dadka qaarkood ku noqon kartaa caqabad. Ma taqaannaa sida loo sheegto baahidaada? Ma taqaannaa cidda laga codsado taageerada marka aad u baahan tahay? Ma taqaannaa sida loo qorsheeyo taageerada aad u baahan tahay? Dhamaan su'aalahan waa qayb ka mid ah marxaladda kala guurka.

## Adeeg iyo taageero isku dhafan

Buugan bilow ilaa dhammaad, waxaanu isticmaali doonaa qaabka hoos ku xusan si looga caawiyo dhalinyarada iyo qoysaska sahminta iyo isku-dubbaridka qaybaha kala duwan ee taageerada. Qof kasta wuxuu u baahan yahay taageero nololeed, isticmaalka qaybaha taageerada iyo adeegyada kala duwan waxay naga caawinaysaa inaan horay ugu dhaqaaqno nolosha aan doonayno. Qaabkan hoose wuxuu kaa caawin karaa adiga iyo qoyskaaga inaad ka fikirto sida loo helo ama la isugu duwo taageerada aad xaqqa u leedahay mustaqbalka.

Noocyada taageerada waxaa ka mid noqon doona:



Access the LifeCourse framework and tools at [www.lifecoursetools.com/](http://www.lifecoursetools.com/)

## La kulan Mickle iyo Nidaamkiisa Taakulaynta Iskudhafan



### AWOODA IYO RAASUMAAL SHAKHSI AHAANEED

Waxaan ahay qof saaxiibtinimo leh, faraxsan xagna maad leh. Waxaan ahay ruux degan oo dadka la socon kara. Waxaan leeyahay dhoola caddayn wanaagsan. Waxaan jeclahay inaan dadka caawiyo! Waxaan ahay ruux jir ahaan xoog leh oo firfircoon.

### KU SALAYSAN CILMI BAARISTA

Waxaan isticmaalaa iPad si aan ugu buuxsado saacadda, taasoo ii sheegaysa markaan gabagabeeyo shaqadayda iyo hawlaha kale.

Waxaan laa-laabaa sanduuqyada pizzaha

### XIDHIIDH KU SALAYSAN

Hooyaday iyo Aabahay ayaa guriga igu caawiya iyo jaaliyadda dhexdeeda

Walaalahey waxay ku maqan yihiin kulliyadda, laakiin way i caawiyaan markay guriga joogaan.

kormeeraha iyo saaxiibada shaqo way



Waxaan tagaa kaniisadda, waxaan ka qayb qaata Oloombikada gaarka ah iyo dhacdooyin badan iyo wax-qabad ka dhaca gudaha degaanka jaaliyadda. Dad ayaan halkaas kula kulmaa, wayna i caawiyaan marka aan u baahdo taageero!

### KU SALAYSAN BULSHO


Waalidkay ayaa iga caawiyay dalbashada adeegyada aan xaqa u leeyahay ahaanshaha qof weyn oo naafo ah. DDA waxay maal-gelisaa daryeele, kaasoo ii kaxeeya Oloombikada gaarka ah iyo hawlo kale. DVR iyo tababaraha shaqadayda ayaa igu caawiyay helitaanka shaqadayda pizzaha iyo barashada waajibaadka shaqo. Waxaan kaligay shaqada u raacaa adeegga gaadiidka dadweynaha.

### XAQ GAAR AH



# Qaybta koowaad

Dhalinyarada, Daahfur gaar ah, iyo Marxaladda kala guurka



## Qaybta 1: Daahfur shakhsiyeed iyo go'aan gaar ahaaneed



Taageero nooc ee ah ayaannu u baahannahay nolosha? Qaybtaan, waxaannu ku weydiin su'aalo muhiim ah oo ku saabsan waxaad ka rabtid noloshaada iyo sida loo qorsheeyo mustaqbalkaaga.

Qaybtani waxay ka hadli doontaa:

1. Daahfur: Yaan ahay aniga? – Qorshaynta Dhexe ee Qofka xiliga kala-guurka
2. Daahfur: Maxaan rabaa Mustaqbalka?
3. Daahfur: Sideen ku heli karaa taageerada aan doonayo Mustaqbalka?
4. Talo: Qoyska iyo saaxiibada way wadaagaan khibradahooda
5. Talo: Aragti meherad leh
6. Keydka macluumaadka

### Dhalinyarada:

- Baadi-goob maslaxadaada, waxaad doorbidayso, awoodaada iyo taageerada aad u bahan tahay.
- Baro go'aan qaadashada iyo inaad aqbasho masuuliyadda go'aanada adiga kuu gaarka ah
- Kala xidhiidh dadka ku caawinaya waxaad rabto iyo waxaad u baahan tahay
- Baro shaacinta macluumaadka naafanimada (**disability disclosure**), goorta, waxa, iyo cidda lala wadaagayo macluumaadka ku saabsan naafanimadaada.
- Baro codsashada howl-fududaynta.

### Qoyska & Daryeelayaasha:

- Taageer dhalinyarada si ay u ogaadeen danahooda, awoodooda, iyo aragtidooda mustaqbaleed.
- Ku kalsoonow awoodda dhalinyarada si ay u qaataan go'aanno iyaga u gaar ah iyo in lagu taageero go'aanadooda.
- Ogow taageerada ay dhalinyarada u baahan yihiin, kuna caawi barashada shaacinta macluumaadka naafanimada iyo cosdiga howl-fududaynta.
- Ku dhiiri geli dhalinyarada in ay la yimaadaan khibrado cusub oo ka caawin ama hor-seedi kara himiladooda mustaqbalka ee xaga nolosha.

## Daahfur: Anigu kumaan ahay?



### Waa maxay Qorshaynta Dhexe ee Qofka?

Qorshaynta dhexe ee qofka (Person-Centered Planning) (PCP) waa geedi socodka qorshaynta diiradda lagu saarayo qofka oo dhan (dhalinyarada) iyo dadka si fiican u yaqaana ee isaga ama iyada taageera. PCP wuxuu soo bandhigaa hab lagu ogaado qofka ruuxa uu yahay, maxay ka rabaan nololsha, iyo sida qofka loo taageero.




### Maxay PCP (Qorshaynta Dhexe ee Qofka) Muhiim u tahay?

Qoyska, saaxiibada, iyo macallimiinta waxay dhalinyarada guriga, dugsiga, ama bulshada dhexdeeda ku siiyaan taageero. Si kastaba ha ahaatee, marka qof dhalinyaro ahi noqdo qaan gaar, taageerada dugsiga iyo macallimiintaba way dhammaan doontaa. Dhalinta da'da yar waxay u baahan yihiin in ay fahmaan naftooda iyo inay muujiyaan baahidooda, ha haystaan ama yaysan haysanin taageerada qoyska. Si aad wax badan oo ku saabsan PCP iyo sida taageero looga helo geedi socodka qorshaynta, hubi bogga khayraadka.

## La kulan Mickle iyo Qoyskiisa



Mickle waa 21 jir, sanadkan ka qalin jabinaya barnaamijkiisa marxalada kala guurka (transition program) isagoo shaqo haysta. Isagu waa ruux dhalinyaro ah oo faraxsan, wuxuuna jecelyahay inuu u kuur galo dadka. Xanuunka autism darteed, wuxuu qabaa baahi badan oo u baahan taageero, gaar ahaan xaga xidhiidhka. Wuxuu inta badan dadka kula xidhiidhaa miidaarin, maxaa yeelay isagu ma jeela taageerada cilmiga farsamada.



Markuu bogay dugsiiga hoose una gudbayay kan dhexe, waxay isaga iyo qoyskiisaba bilaabeen in ay sameeyaan **PCP (Qorshaynta Dhexe ee Qofka)**. Waxay ka caawisay inay wax badan ka ogaadaan Mickle qofka uu yahay, waxay awoodiisu tahay, iyo wuxuu jecel yahay inuu sameeyo. Waxay aqoonsadeen taageerada uu u baahan yahay, goolka qoyskiisa iyo riyada Mickle ku fikirayo. Maxaa yeelay, waxay horey u bilaabeen **PCP**. Mickle iyo qoyskiisa waxay u diyaargarooheen isbeddelada la socda marxalada kala guurka. Wixii macluumaad dheeri ah ee ku saabsan **PCP**, waxaa laga heli karaa bogga keydka macluumaadka (p.16)

## Daahfur: Maxaan Rabaa Mustaqbalka?

Dhalinyarada qaar waxaa laga yaabaa inay ogyihiin waxay ka doonayaan noloshooda - shaqo helid, kulliyad aadid, ama nolol-dheer oo hiwaayad ah. Waxaase laga yaabaa in dhalinyarada qaar iyo qoysaskooduba aysan garanaynin waxay ka doonayaan mustaqbalka.

Si kastaba ha ahaatee, waa muhiim in la ogaado waxa ay dhalinyarada iyo qoysku rabaan ama aysan u rabin noloshooda dugsiga sare ka dib. Guusha marxalada kala guurka waxay u baahan tahay in loo qorsheeyo tallaabo-tallaabo. Qoysaska iyo dhalinyaradaba waxaa u soo baxaya natiijooyin wanaagsan, waa haddii ay qorsheeyaan waxay dhalinyaradu u baahan yihiin inay bartaan iyo waaya-aragnimada ama macluumaadka ka caawin doona u diyaar-garowga nolosha dadka waaweyn.

## Waano Qoys: Maxay tahay muhiimadda ay leedahay qorshaynta hore?



"Anaga ahaan, shaqada waa qayb aad muhiim ugu ah nolosheena. Mickle wuxuu jecel yahay inuu dadka ka ag dhowaado, sidaas darteed wuxuu helaa nolol aad u fiican hadduu wax ku hawlan yahay ama hayo shaqo u ogolaanaysa inuu dad ka ag-dhowaado. Qorshaynta marxaladeena kala-guurka, waxaannu ka fikirnay waxyaabaha uu u baahan yahay inuu sameeyo isagoo madax-bannaan. Wuxuu u baahan yahay inuu yeesho hab-dhaqan ay dadka aqbali karaan. Wuxuu u baahan yahay inuu awood u yeesho fahamka

amarrada aasaasiga ah. Kuwani waa waxyaabaha aanu ku fikirinay. Mickle aad ayay ugu badan yihiin inuu barto, sidaa daraadeed, horey ayaanu u bilownay, isuna tusnay taageero noocee ah ayaa isaga u shaqaynaysa."

## Mickle and Aragtida Qoyskiisa ee Mustaqbalka

### WAXAANAN doonaynin:

In la igula dhaqmo ixtiraam darro  
Inay dadka aniga go'aan ii gaadhaan  
Inaan gooni ama go'doon noqdo  
Inaan guriga joogo maalintii oo dhan



### Aragtidayda ku aadan nolol WANAAGSAN,

Inaan ka ag-dhoqaado dadka aan  
jeclahay  
Inaan noqdo ruux la qadariyo oo  
faraxsan  
Inaan shaqo helo  
Inaan hiwaayadaha ku raaxayso

## Khibradaha caawiyay Mickle muddada marxaladda kala guurka



Wuxuu xirfadaha bulshada iyo nolosha ku bartay guriga iyo dugsiga



Wuxuu si iskaa wax u qabso ah ula shaqeeyay Aabe iyo xubnaha Kaniisadda



Wuxuu ka qeyb qaatay Oloombikada gaarka ah



Wuxuu bulshada dhexdeeda ka helay hiwaayad

## Sida Qoyskayagu u Taageeray Mickle muddada Marxaladda kala guurka



"Waxaan aragnay in waalidiin badan ka baqayaan inay ilmahooda naafada ahi tijaabiyaan khibrado cusub. Laakiin haddii aynu had iyo jeerba ku dhahno "MAYA," waxay ka cabsanayaan inay wax dambe isku dayaan ama ay naftooda ku kalsoonaadaan. Waxaannu Mickle u ogolaanay tan iyo markuu yaraa inuu isku dayo khibrado cusub. Wuxuu sameeyey khaladaad intuu tijaabada ku jiray, laakiin marnaba wax weyn kama aanan soo qadin. Maxaa yeelay, waxaan ognahay in Mickle ay waqti ku qaadanayso inuu la qabsado khibradaha cusub, kama filayno inuu noqdo mid saxan/kaamil ah. Way haboon tahay in guulahiisa la tiriyo marka loo eego waxyaabaha uusan samayn karin."

## Daahfur: Sideen ku heli karaa Taageerada aan u Baahanahay?

Dadka oo dhan waxay isticmaalaan taageero isku dhafan si ay u gaaraan nolol ay ku raaxaystaan. Helitaanka taageero iyo khayraad kala gedisan waxay dhalinyarada ka caawisaa inay kordhiyaan fursadahooda. Si aad u bilowdo, baro noocyada kala duwan ee taageerada.

### Mickle iyo Nidaamka taageeradiisa isku dhafan




The **Life Trajectory Worksheet** waa qalab waxtar leh oo lagu baadho fikradahaaga ku saabsan mustaqbalka. Waxay kaloo kaa caawin kartaa xidhiidhka dadka ku taageerayo mudada geeddi-socodka xilliga kala guurka.

[www.lifecoursetools.com/planning/](http://www.lifecoursetools.com/planning/)

## Waa maxay Shaacinta Itaal-la'aanta (Disability Disclosure)?

Marka ay shakhsiyaadka naafada ahi noqdaan dad waaweyn, waxaa jiri doona xaalado ay u baahan doonaan inay sharaxaan naafanimada. Shaacinta naafanimada waxay ka dhigan tahay inuu qofku la wadaago macluumaad ku saabsan naafanimada si loo gaaro ujeedo gaar ah. Si kastaba ha ahaatee, Shaacinta naafanimada waa doorasho. Qofka naafada ahi ma ahan inuu faafiyo macluumaad gaar ah hadaysan shaacintu lagama maarmaan ahayn.



*Mararka qaar waxaad u baahan tahay inaad ka hadasho wax ku saabsan naafanimadaada si aad u hesho taageerada aad u baahan tahay. Naafanimadu ma ahan wax xun ama ceeb ah. Waa qayb ka mid waxa aan ahay. Aniga ayaana kala dooranaya goorta iyo cidda aan kala hadalayo wax ku saabsan naafanimadayda-sida kulliyadaha ama shaqada. Waxaan ku talinaynaa inay dadku ogaadaan sida loo shaaciyo naafanimadooda sababta oo ah waxay u baahan karaan howl-fududayn. Taageeradaas la'aanteed, waxaa laga yaabaa inay kugu adkaato inaad gaadho guul xaga shaqada ama waxbarashada*

**How fududayntu** waa diyaar garaynta waxa shakhsiga naafada ahi u baahan yahay si uu u helo sinnan fursadeed oo xaga iskuulka, shaqada ama bulshada dhexdeeda ah.

Si aad wax badan oo ku saabsan **Shaacinta Naafanimada** iyo **howl fududayn**, fadlan eeg bogga keydka macluumaadka (p.16).

## Maxay Shaacinta Naafanimadu Muhiim u tahay?

Inkastoo dhallinyarada naafada ahi dhigtaan dugsiga, hadana qoysaskooda, macalimiintooda, iyo ku xirfadlayaasha ahiba way fahmaan baahidooda, waxayna u diyaariyaan sidii howshooda loo fududayn lahaa. Si kastaba ha ahaatee, marka ruux dhallinyaro ahi uu dhameeyo dugsiga uuna noqdo qof qaangaar ah, howl fududayntu ma ahan mid iska imanaya. Qofka taageero lama siin doono illaa uu isagu ama iyadu codsato in howsheeda (diisa) la fududeeyo.

Waxaa aad muhiim u ah in la fahmo sida loo weydiisto howl fududaynta.

Macalimiinta waxbarashada gaarka ah iyo xarumaha noolasha madaxa bannaan way ka caawin karaan in dhalinyarada iyo qoysaskuba fahmaan **Shaacinta Naafanimada**. Waxay sidoo kale ka caawin karaan dhalinyarada iyo qoysaska faafinta macluumaadka shakhsiga ah ee ku saabsan naafanimada iyo codsiga howl fududaynta. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xarumaha nololaha madaxa bannaan waxaa laga heli karaa internetka iyo bogga keydka macluumaadka (p.16).

## Talo: Qoysaska iyo saaxiibada waxay ka hadlaan shaacinta iyo nafta oo loo dodo.



*Qoysasku waa inay yeeshaan hami sare iyo inaysan u malaynin in ruuxu waxba uusan samayn karin maxaa yeelay waa naafo. Haa, mararka qaar waxay noqon kartaa mid adag, laakiin taageerada iyo dhiirigelinta waxay ka caawisaa dhalinyarada inay isku dayaan khibrado cusub. Wiilkaygu waa naafo, laakiin waxaan ogahay inuu awoodo barashada waxyaabo badan. Waqti iyo taageero ayaa ku caawin doona barashada waxa uu u baahan yahay.*

*Waa muhiim inaad barato sida iyo goorta aad ka hadlayso naafanimadaada. Waxaan kaligay bartay sida go'aanada loo gaaro anigoo taageero ka helay qoyska, macalimiinta, iyo dadka kale ee noloshayda xiriirka la leh. Waxaan soo saaray awoodayda, waxa aan jeclahay ama aan necebahay. Waxaan isku dayay hawlo kala duwan, sida in bulshada iskaa wax u qabso loogu shaqeeyo iyo ciyaaridda isboortiga. Waxaan la soo baxay wax badan oo aniga igu saabsan iyo waxaan bartay sidii aan mas'uuliyadda go'aanadayda u qaadan lahaa. Qof kasta wax buu ka baran karaa khaladaadka.*



*Haddii aad ku xiranaato waalidkaa inay kuu hadalaan, dadku ma kala garanayaan waxaad jeceshaha iyo waxaad jeclayn. Waa muhiim inaad hadashid! Hadal, u sheeg qoyskaaga iyo macalimiintaada waxaad doonayso inaad samayso. Haddii aadan hadlin, kuma caawin karaan, waxaaba laga yaabaa inaad ugu dambayn samayso waxyaabo aadan jecleyn.*

## Sidee qoysaska u caawin karaan?

Qoyska waxay ku caawin karaan dhalinyarada barashada ku saabsan Shaacinta Naafanimada, goorta iyo sababta ay muhiim u tahay in la faafiyo macluumaad ku saabsan isaga ama iyada naafanimadeeda. Si aad wax badan uga barato ama si aad u hesho caawino, fadlan eeg bogga keydka macluumaadka ee dhamaadka qaybtan (p.16).

## Resources

### Person Centered Planning (PCP)

Individual & Relationship-based support: Ready to make your personal profile with family and friends?

- My Life Plan: <http://www.mylifeplan.guide/>
- Life Trajectory Worksheet and one page profile: <http://www.lifecoursetools.com/planning/>

Community Based Supports & Resources: Where to get information about personal assistance on PCP?

- Informing Families: <http://informingfamilies.org/person-centered-planning/>
- Washington PAVE: <http://wapave.org/programs/person-centered-planning/>
- Open Doors for Multicultural Families: <http://multiculturalfamilies.org>
- Independent Living Center: Find your local chapter at <http://www.wasilc.org/> under the “IL center” tab
- The Arc: Find local chapter at [http://arcwa.org/aboutus/local\\_arc\\_chapters](http://arcwa.org/aboutus/local_arc_chapters)

Eligibility-based Supports & Resources:

- If you are client of Maamulka Horumarinta Naafada (Developmental Disabilities Administration) (DDA) ama Qaybta Xirfadaha Baxnaaninta (Division of Vocational Rehabilitation) (DVR), contact your case manager.

### Self-Advocacy & Disability Disclosure

Community-Based Supports & Resources:

- Independent Living Center: Find your local chapter at <http://www.wasilc.org/> under the “IL center” tab
- The Arc: Find local chapter at [http://arcwa.org/aboutus/local\\_arc\\_chapters](http://arcwa.org/aboutus/local_arc_chapters)

Online Resources:

- 411 disclosure: <http://www.ncwd-youth.info/topic/disability-disclosure>
- Parent Center Hub: <http://www.parentcenterhub.org/repository/disability-disclosure-video/>

**Wixii su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan keydka hagtadan, ama haddii aad u baahan tahay caawino qof Somali ku hadla, fadlan la xiriir:**

Open Doors for Multicultural Families

253-216-4479

[www.multiculturalfamilies.org](http://www.multiculturalfamilies.org)



## Noloshu Dugsiga Sare Ka Dib Qaybta 2: Xiriirka Kala Guurka Iskuulka



**SOMALI**

## Contents

<b>Waa maxay Xuqooqdooda Waalidka iyo Ardaygu (Nidaamka Nabadaynta)? .....</b>	<b>2</b>
<b>Waa maxay Barnaamijka Kooxda Waxbarashada Shakksigu IEPgu xiliga Kalaguurka? .....</b>	<b>3</b>
<b>Waamaxay Barnaamijka Kala Guurku? .....</b>	<b>11</b>
<b>Waqtimq iyo side baan u qalinjebinaya? .....</b>	<b>12</b>
<b>Waanada Waalidka iyo Dhalinta ee Salka Ku haysa Kala Guurka Dugsiga.....</b>	<b>12</b>
Dacwadaha Waxbarashada Gaarka ah.....	13
KEYDKA.....	15

## Cinwaanada

*Kaydka Timaamaha Akhbaartan waxa hore u mariyay deeq ay bixisay waaxda waxbarashada ee U.S, Xafiiska waxbarashada Khaaska ah iyo carbinta qofka jiran Office of Special Education an*

*Rehabilitative Services (OSERS), #H235F140013. Xogta Tilmaa mahani lagama maarmaan maaha inuu matalo siyaasada ama ka turjumaysa aragtida waaxda waxbarasha ee U.S., Xafiiska waxbarashada Khaaska ah iyo carbinta qofka jiran Office of Special Education and Rehabilitative Services (OSERS). Majiraan ayidis rasmi ah ee Dawlada Dhexe ay kala dhex baxday. Albaabada Furani ee isku dhafka waxa ay hore u mariyeen tilmaa hani oy kala shaqaysay Xarunta xarunta adeega marxaldaha ka la guurka iyo xirfad layaasha mujtamacu. Ashkhaastu laga yaabe inay abuuraan qaybo ka mid ah dokumentiga. Fadlanaamin soosaarka iyo dhaqaalaha dawlada. Akhbaarta brojeetadan waxa aad ka hei kartaan halkan:*

<http://multiculturalfamilies.org/wordpress/youth-transition-program/>.

## Qaybta 2: Xiriirka Kala Guurka Iskuulka



Sidee bay qof welba noloshiisu u eekaan doontaa ka deb marka aan dhamayno skuulka? Marka aan sii weynaa naba, xarakaadkeena maalin nimo wuu sbedelaysaa Qaybtan waxaan is weydiinaynaa, su'aalo muhiim ah nolosheena maalin nimo.

### Qaybtani waxay cadaynaysaa:

#### Marxalada Kala Guuritaanka Iskuulka

1. Waa maxay **Xuquuqdq Waalidka iyo Ardaygu** ee la xiriirta adeega kala guurk Labaad?
2. Waa maxay **adeega kala guurku**?
3. Waa maxay **Mashruuca Kala Guurku**?
4. Maxaan sameeyaa marka aan qabo mushkilad iskuulka ah ama barnaamijka waxbarashada shakhsiyaysan **Individualized Education Program (IEP)**?

#### Dhalinyarada:

- La hadal macalimiintaada ama lataliya yaasha iskuuka si aad u sahamiso qurshaha mustaqbalkaaga.
- Ka qayb qaado kulamada Barnaamijka Waxbarashada Shakhsiga ah(IEP) la wadaag danahaaga iyo rabitaankaaga mustaqbalka
- Isku day khibrado cusub iyo fursado kale si aad u ogaato shaqo nooc ee ah iyo bey'ada shqo aad jeceshay iyo xiriirka awoodeed ee shaqadaada.
- Caday guriyayntaada taaso kaa caawindoonta si aad uguulaysato qaan gaadh nimada.

#### Qoysaska & Daryeelayaasha:

- Faham **Xuquuqda Waalidka iyo Ardayga** oo la xiriirta adeega kala guurka.
- Baro habka marxalda guuritaanka ee iskuulka salka ku haysa.
- Ka qayb qaado qorshaha shirarka kala guurka
- Baro hababka loo caawino kaydka si loo kordhiyo kala doorashada mustaqbalka dhalinyarada.
- Caawi dhalinyarada kuwa qaraarada qaata dib u eegida rabitaan koogda iyo awoodooda.

## Waa maxay Xuqooqdooda Waalidka iyo Ardaygu (Nidaamka Nabadaynta)?

Shakhsiyaadka Falka Waxbarshada Khaaska u baahan {(Disabilities Education Act (IDEA)} waxy uga baahan yihiin dugsiyada dadweynuhu inay u fidiyaan akhbaar la xiriirta Waxbarshada Khaaska. Kuwaas oo ku qeexan dokumentiga loo yaqaano, **Ogoysiinta Nidaamka Nabadaynta**

**Waxbarshada Khaaska ee Ardayda iyo Qoysaskaska.** Iskuulada Degmooyinku waa inay siiyaan nuqul dokumentigan marka:

1. Marka u horaysa ee ardayga loo diro qiimaynta Waxbarshada Khaaska ah.
2. Marka ugu horaysa ee iskuulku ka helo cabasho ama/ marka ugu horaysa ee ay cabashadu socoto xili dugsiyeedka;
3. Qaraar la gaaray in ardayga laga saaro in ka badan toban casho la cayriyo sanad dugsiyeedka; ama
4. Waalidku uu dalbado macluumaad.

## Waa maxay muhimada ay leedahay adeega kala guurka skuulka salka ku haya xiriika kala Guurka Iskuulku?

1. Ardayda Barnaamijka Waxbarashada Shakhsiga ah IEPga leh oo dhami waxay xaq u leeyihiin adeega kala guurka markay da'doodu gaarto **liix iyo toban sano**.
2. Marka adeega kala guurku uu noqdo qayb ka mid ah IEPga ardayga 16ka jira ah, bartilmaameedka adeegyada oo dhami waa inuu u diyaariyaa ardayga nolol dugsiya sare kadib, khaasatan wixii Ixiriira:
  - a. waxbarasho sare ama tababar;
  - b. shaqaalayn; iyo
  - c. ardayda u baahan, madaxbanaani nololeed.
3. Diyaar garawgani waa muhiim, marka uu ardaygu qaan gaar noqdo uu ka gudbo nidaamka dugsiya dadweynaha, wax alaale iyo wixii la xiriiraayay adeega baahida khaaska ah iyo taageerada **wax uu xaq u leeyahay**. Tan micnaheedu waxa weeyi qaan gaarka ee u baahan inuu dalbado ee u qalmaa adeegaa.
4. Kuwa qaan gaarka ah ee adeega khaaska ah ubaahan **oo keliye** uma qalmaan adeegaa.
5. Waxaad u mari kartaa adeega guurtiaankanka iskuulada oo ah dariiqada ugu wanaagsan ee lagu diyaariyo nololsha dugsiya sare kadib.


- La hadal macalimiinta iyo lataliyaasha xirfada leh ee iskuulada, ka qayb qaado dhaq dhaqaaga waxbarasho ee dheeraadka ah, iyo in ka badanba.
- Isku xir kaydka adeega dadka waaweyn taasi oo kaa caawin doonta hore u marinta nolol maalmeedka, koleejka, iyo shaqada.
- Baro noocyada taageerada shaqada caruurta
- Ka qayb qaado adeega codsashada iyo taageerada nolol maalmeedka.



## Waa maxay Barnaamijka Kooxda Waxbarashada Shakksigu IEPgu xiliga Kalaguurka?

Ardayga xaqa u leh adeega waxbarashada shakhsiga ee haysta Barnaamijka **Waxbarashada Shakhsiyaysan (IEPga)**.

Kooxda **IEP**du waa in lagu daraa ardayda iyo waalidka ama masuulka rag/dumarba. Waa in lagu daraa kaaliyayaasha adeega dadka waa weyn kooxda IEPda xiliga kala guurka.



## Xilima ayuu Kala Guurku Bilawdaa?


Sharci ahaan, Kooxad **IEP**du waxay u baahan tahay inay bilowdo **adeega kala guurka** marka uu ardaygu gaaro 16 jir.

Ardayda hessa adeega Waxbarashada Khaaska ah ee xaqa u leh inay ka helaan dugsiyada dadweynaha adeega **bilaashka ah ilaa inta ay dhacayaan waxaa hoos ku qoran:**

Ardayga oo go'an saday in aanu u baahnayn adeega waxbarashada khaaska ah ee salka ku haya qiimaynta iskuulada degmada;

- Ardayga ee kaqalin jebiyay dugsiga sare;
- Ardayga ee da'adiisu gaartay labatan iyo kaw sano; ama,
- Waalidka ardayga oo qoraal kaga noqday inuu ilmihisu sii wato waxbarashada khaaska ah iyo wixii adeeg ahaan la xiriira.

## Siduu u eeg yahay Geedi-socodka Habka Kala Guurku?



(Asalka: Xarunta isbedelka Adeega Kala Guurka)

Qaybta labaad ee tilmaamahani wuxuu faah faahinayaa talaabooyinka hab u socodka kala guurka. Waa muhiim in si tusmaysan loo xasuusnaado talaabooyinkan geedi socodka, laguma talin inaad ka boodid mid ka mid ah talaabooyinkan.

# Dada Ku Haboon Qiimaynta Kala Guurka



## Da'da Ku Haboon Qiimaynta Kala Guurka

Qurshaha kala guurka wacani wuxu ka bilowdaa **Dada Ku Haboon Qiimaynta** si uu u cadeeyo **rabitaanka, awoodaha, kala hor-marinta** iyo **mucaawinada baahiyaha**. Qiimaynta rasmiga iyo tan aan rasmiga ahayni way ku haboon ardayda badankooda.



- Waxan rabaa inaan noqdo caawiye kalkaaliye.
- Waxaan ku fiican ahay la shaqaynta caruurta!
- Waan door bidaa la shaqaynta carruurta.
- Waxan u baahan ahvin la ixasuusivo

Qiimayntu waa dariiqada lagu ururiyo xogta. Matalan, liiska warbixineed waxa loo adeegsan karaa tababarka xirfadeed ama danaha. Taasi oo badanaaba ah kuwa ugu qiimaha badan marka akhbaarta laga ururiyo ardayda iyo qoysaskoodaba.

Dhamaystirka **qofka oo xaliya qurshihiisa** ayaa ugu wanaagsan si loo ururiyo qaybta kala guurka ee la xiriirta qiimaynta akhbaarta (eeg Qaybta 1).





**Ujeeddooyinka dugsiga sare ee la qiyaasi karo Dugsiga sare ka dib** micnaheedu waxa weeye nolosha dugsiga sare ka dib. Ardaydu maxay qabtaan marka ay ka baxaan dugsiga? Ma Koolej bay tegaan? Ma shaqo ayay aadaan? Ma qol bay ka galaan jaaliyada? qiyaasta qastigaaga dugsiga sare waxa weeye ujeedka nolosha ardaygu marka uu ka baxo dugsiga, taaso ka duwan IEPga sanadlaha ah (akhbaar intaa dhafsan oo ku saabsan ujeedka IEPga sanadlaha ah, aqri safxada 10naad). Xiliga kala guurka IEPga ardayga, kopoxda IEPgu waxay ku qori doonaan muradka ardaygafor:

- 1) Waxbarashada iyo Tababarka
- 2) Shaqo
- 3) Nolol Madax banaan (sida ku haboon).

Qaar dhalin yar ah iyo waalidkoodu waxa laga yaabaa inay fahamsanayn sida ay muhiim u tahay shaqada iyo koolejku. Baro musaacadada ugu diyaarka ah shaqada iyo koolejka curyaamiinta waaweyn qaybta 3: nolol maalmeed

Doorashooyinkani waxa laga yaabaa inay dhalinyaradu ka maqsuudo noloshooda dugsiga sare ka dib.

Ujeedku waa inuu ahaadaa khaas qoraalkuna waadix si ay u suurta gaho in la qiyaaso. Ujeedku waa inuu khaas ahaadaa qoraalkuna waadix si ay u suurta gaho si aan loogu samaynin liiska aan la mid ahayn ujeedka IEPga ardayga ee sanadlaha ah.

Ujeedka dugsiga sare kadib waa in lagu daraa dhaq dhaqaaqa dugsiga sare ka dib. Ujeedka IEPgu waa inuu caawinaa ujeedka ujeedka dugsiga ka gadaal.



**Tusaale xun:**

“Iskuulka sare kadib, Rahma waxay rabtaa inay aado koleejka go to ege”

**Ujeeku waa inuu waadix iyo gaar ahaadaa!**

“Rahma waxa ay geli doontaa koleejka jaaliyada oo ay kabarandoonto kal kaaliye caafimaad qalin jebinta ka dib”

“Rahma waxay isticmaali doontaa gaadiidka dad weynaha koleejka ilaa shaqadeeda”

“Rahma waxay qaadan doontaa gaadiidka dadweynaha si madaxbanaan u tagto kulliyadda iyo shaqada”



### Adeega Kala Gurka iyo Wax Qabadkooda

Adeega Kala Gurka waxa laga yaabaa in lagu daro **tilmaan bixin, adeeg la xiriira, khibradaha jaaliyadaha, and xirfadaha nolosha ee xorta ah**. Adeegyada oo dhami, adiga oon u eegin noocba, waa in la caawinaa ardayga isu diyaarinaya nolosha qaan gaadhka, khaasatan u gudbaaya muraadkiisa dugsiga kadib.

Qastiga dugsiga kadib waa inuu goaankaasi waa inay **da’du ku haboon qiimaynta kala gurka**

#### Adeega kala Gurka & Howlaha ee Mickle



- **Tilmaamaha:** Bulshada, xiriirka & xirfadlaha shaqada.
- **Adeegyada laxiriiriyay:** Baraha hadalka iyo caawinta Tiknoolijiyada ee isgaarsiinta
- **Khibradaha Jaaliyada:** Xirfadaha macaamiisha / bulshada ee goobta shaqada, goob booquash ee xarunta jaaliyada.
- **Xirfadaha nolosha:** Karinta, u qaadashada guriga oo shaqeynaya



## Qor Casharka Waxbarashada Socota.

### Koorsada Barashadu

**Koorsada barashadu** (Qurshe tilmaan bixineed) arday kasta si gooni ah ayuu u arki karaa, ujeedkiisa ka dib. Kooxda IEPdu waa inay qorsheeyaa koordka waxbarasho sanad welba inta uu ardaygu dugsiga ku jiro.

**Tusaale: Muraadka shaqada bartilmaameedka Mickle.**

#### Diirad U Saarka Himilooyinka Shaqo ee Mickle

- Mickle wuxuu sii wadan doonaa waxbarasho gaar ah oo loogu talagalay manhajka kale. Oo ay ku jiraan barashada akhriska ee is-daryeelidda, xirfadaha isgaarsiinta, waxa kale oo uu ka qayb qaadanayaa khibrada shaqada, bulshada dhexda 4 sano ee dugsi sare.

#### Kadib Himilooyinka Waxbarashada Dugsiga Sare ee Rahma

- Rahma wuxuu sii wadan doontaa waxbarasho gaar ah oo loogu talagalay akhriska, xisaabta, quoraalka, iyo bulshada.dabeecada 2-di sano ee ugu dambaysay dugsiga sare. Kadib markay qulinjabiso shahaadada dugsiga sare.



## Adeega Isku dubaridka Hayadaha Dadka Waa weyn

### Qasdiga IEPga Sanad laha.

**Qasdiga IEPga Sanadlaha (Annual IEP goals)** waa mudo gaaban qastiga sanad laha ah. Marka IEPga lagu daro adeega kala guurka, qasdiga

IEPgu waa inuu caawinaa ujeedka dugsiga kadib.

#### Tusaale:

##### Ka Caawi Mickle siuu ugu Diyaar Garoobo Shaqada...

- **Ujeedada Sanadka:** Xirfada Shaqada & Akhlaaqda iyadoo loo eegayo goobo ku salaysan jaaliyada, Mickle wuxuu muujin doonaa awoodda uu u leeyahay inuu u madaxbannaanaado xirfadihiisa iyo akhlaaqdiisa. Waxa uu xiran doonaa dharka anshaqadiisa laga bilaabo fursadaha 4/5 ilaa 5/5 fursado ka badan 5 cabbir xog oo isku xigxig ah.

##### Ka Caawi Rahma siay ugu Diyaar Garwdo Koleejka...

- **Ujeedada Sanadka:** Waxbarashada / Xirfadaha Ururka Marka la siiyo casharada fasalka, Rahma waay qori doontaa ugu yaraan hal cashir ama hal mawduuca fasalka. Waxay hore u marin doontaa xirfadaha aqoonteeda celcelis ahaan 0 ilaa 5 maalmood usbuuciiba sidaay cabbirtay xogta ururinta macallinku



## Mag-koordinado Ng Mga Serbisyo Sa Ahensya Ng Matatanda

### Isku dubbaridka adeeg yada wakaaladaha dadka waaweyn.


Qoysaska iyo asxaabtu waxay u fidiyaan musaacado dadka waaweyn ee curyaamiintah. Arintu sikataba ha ahaatee waa in loo raadiyaa adeega oo muhiim u ah ardayga iyo qoyskiisaba.

### Tusaale ahaan qaar ka mid ah Wakaaladaha Dadka waaweyn:

- Hore u marinta Maamulka Disabilities
- Developmental Disabilities Administration (DDA)
- Qaybta Xirfada Baxnaaninta
- Division of Vocational Rehabilitation (DVR)
- Maamulka Xasiloonida Bulshada
- Social Security Administration
- Guriga iyo Adeega Jaaliyada
- Home and Community Services (HCS)
- Musaacado Caafimaad
- Medicaid

Ardayda iyo qoysasku waa inay bartaan wakaaladaha iyo adeegooda xiliga dugsigu sare.

Araajida wakaaladuhu wey kala duwan yihiin waqtina wey qaataan. Si aad u barato wakaalad welba, eeg **lifaaqa**.



<https://www.seattleu.edu/ccts/agency-connections/>

## Waamaxay Barnaamijka Kala Guurku?

**Barnaamijka Kala Guurku** guud ahaan waxa loogu tala galay ardayda da'doodu tahay 18-21 ku waas oo ka heli doona adeega special education dugsiyada degmada dadweynaha. Barnaamijka kala guurku xirfad uu ku qorshaysto siinayaa ardayga shaqad, Koolelg tegida, am iyaga oo hela khibrada isku marka laeego sharciga IEPga.

Kooxda IEPdu waa inay ka munaaqashoodaan barnaamijka kala guurku inuu yahay inuu mid haboon yahay. Hadii ardaydu iyo waalidkoodu aanu hubin, waainay waaxda Special Educationka ee dugsiyada dad weynyhu dib u eegtaa barnaamijka kala guurka, ama shir loo qabtaa macalimiinta kala guurka. Aradaydu, arintu sikastaba ha ahaatee, kama qayb qaadan karaan mar haday ka qalin jebiyaan diploomada dugsigga sare. Arintu sikastabe ha ahaatee, mar haduu ardaygu xaq u leeyahay inuu helo adeega special educationka, wuu haysan doonaa adeegaasi oo lacag la'aan ah.

## Muxuu U Yahay Muhiim Barnaamijka Kala Guurku?

**Barnaamijka Kala Guurku** laga yaabe inuu bixiyo khibrado waxbarsho oo caawiya ardayga si uu usameeyo kala guur suuban si ay jaaliyadu ugu noolaato sidii dad waaweyn.



Community experiences



Job-readiness training



College readiness



Instruction on daily living skills

## Waqtimq iyo side baan u qalinjebinaya?

Gobaladu wey ku kala duwan yihiin waxa lagu qalin jebiyo. Gobolkan Washington, waxa lagaga baahan yahay inaad ka qalin jebiso dugsiga waa'i:

- Inaad kasbato darajada dugsiga sare
- Ka gudubto imtixaanaadka gobolka ama ogolaasho loogu bedelay imtixaanadaas
  - Arayda oofisa inay ka gudbaan heerka imtixaanku waxay kasban doonaa shahaadada Guusha Waxbarashada muhiimka ah (CAA)
  - Waxa jira bedel loogu bedeli doonu doonaa ardayda caawimada khaaska u baahan ee oofisa wixii looga baahnaa. Ardaya adeegsata hab u dhigma waxay kasban doonaan shahaadada shahaadada Guusha ee Muhiimka ah (CIA).
  - Labada hab dhaqmeed waxa ay ku kulmi doonaan wax yaalaha looga baahan yahay dibloomka dugsiga sare ee caadiga ah.
- Dhamaystirka Dugsiga Sare iyo Qursha kadib

Madaxa ku hay baahiyahaasi inay isbedeli karaan. Arintu sikastabe ha haatee, waxa laga rabo ardayga dhigata faslka 9aad waxay ahaan doontaa sidaas. Inkastoo waxa laga rabaa ay isbedli karaan hadhowte. Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha (OSPI) ayaa idin kala socodsiin doona shabekadiisa internetka.

Waxa intaa raacsan, dugsi welba oo degmada ihi waxa laga yaabnaa inuu wax gaar ah uu rabo.

## Maxay muhiim u tahay Shahaadada Dugsiga Sare?

Ardaydu waxay u baahan yihiin inay kasbadaan dibloomka dugsiga sare ama GED hadii ay qorshaynayn inay koleej aadaan ama shaqo u baahan shahaada dugsiga sare. Xasuusnow makra uu qofku qalin jebiyo uu shaadada qaadato, inaanuxaq u lahayn inuu helo adeega khaaska ah ee dugsiyada dadweynaha. Kooxda IEPdu waa inay u qorsheeyaan oo ay hubiyaan ardaygu inuu qaatay adeegii uu u baahnaa oo dhan inta aanu qalin jebin.

## Miyaan marayaa xafllada qalin jebinta aniga iyo saaxiibadahay?

Haa. Hadii arday IEPu ka qayb qaadanayo barnaamijka afarta sano ee dugsiga sare. Ardaygu helimaayo shahaadada dugsiga sare. Arintu si kastaba ha ahaatee, sharciga **Kevin's law (RCW 28A.155.170)**, ayaa qeexaya ardayga ubaahan caawinta khaaska ah wuxuu codsan karaa inuu kala qayb galo xafllada saaxiibadiisa ay isku fasalka yihiin

## Waanada Waalidka iyo Dhalinta ee Salka Ku haysa Kala Guurka Dugsiga

*Waxa la igu yiri ma qalin jebin kartid, shaqo ma heli kartid, koleejna ma tegi kartid. Marka dadku yiraahdaan "waxba ma qaban kartid," hoos bay kuu dhigi". Laakiin ha ka ogolaan inuu qofna ku joojiyo.*

